



**Buugga Siyaasadda iyo Nidaamka Booliska
ee Waaxda Booliiska Minneapolis**

Lambar:
5-300

Mujalladda shanaad - Xeerka Anshaxa iyo Isticmaalka Xoogga

Isticmaalka xoogga

5-306 Doorashada Xakamaynta- Xoog Jireed

(xx/xx/23)

Dib u eegis lagu sameeyay xeerarkii hore: (09/08/20) (12/22/20) (04/04/21) (01/01/23)

I. Ujeedo

Ujeedada xeerkan ayaa ah in la ballaariyo shuruudaha xeerarka kale ee xoogga, gaar ahaan kuwa la xiriira xoog jireed

II. Qeexitaan

Xoog jireed: Xoog jireed (sidoo kale loo yaqaan xeeladaha gacanta maran) waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn:

Miisaanka jirka in lagu dhejiyo: Xakamaynta dhaqdhaqaaqa la beegsada iyada oo la adeegsanayo miisaanka jirka si loogu dhejiyo la beegsada dhulka ama sagxada.

Cadaadis Xakamayn: Xakamaynta dhaqdhaqaaqa la beegsada marka la beegsada uu taagan yahay iyada oo la isticmaalayo miisaanka jirka si loogu xakameeyo la beegsada shay aan dhaqaaqeyn (tusaale cadaadis marka la beegsada lagula yaho baabuur ama dhismo.

Gacan ka qabashada: Qabashada ku meel gaarka ah ee gacanta, curcurka, cududda, ama garabka si loo xakameeyo jidhka ama jihada la beegsada.

Taagidda Kalagoyska: Maareynta kalagoysyada labeeegasaha ilaa ay ka gaarto heerka ugu sareeya ee eysan dhaqaaqi karin iyo kor u kaca - taagiddacurcurka, taagidda garabka, taagidda suxulka, iwm.

Maareynta kalagoyska: Jir ahaan u qalloocinta kalagoyska la beegsada si loo xakameeyo ama loo xaddido dhaqdhaqaaqa.

Meelaha cadaadiska neerfaha: Cadaadis taabasha ah ayaa la gaarsiin karaa si loo helo u hoggaansanaanta waxaana laga yaabaa inay keento xanuun ku meel gaar ah.

Xeeladaha dhul geynta ama wax ka qabashada: Isticmaalka xoogga jirka si aad qofka ugu jiheyso dhulka.

1. Haddii riixid ama horay u riixid awoodleh aad la beegsada kula qabato dhulka ama sagxada, waxay ka dhigantahay dhul-dhigid.

2. Ka soo saarista baabuurta ee ku dhammaata dhulka ama sagxada waxay ka dhigantahay dhul-dhigid.

Riixis: Isticmaalka xoog jireed si aad hore ugu riixdo isku day inaad keento dhaqdhaqaaq.

Ku dhufashada: Feer, haraanti, jilbeyn, dharbaaxsho.

Erayada lagu qeexay P&P 5-304:

- Qaadis
- Geyn
- Ridista
- Muujin
- Ku howlan la beegsadaha
- Ku taagis
- Isticmaal

III. Xeer

A. Xeerka iyo Mabaadi'da Hagidda

Marka lagu daro u gaar ahaanshaha xeerkan, shaqaaluhu waa inay raacaan shuruudaha dhammaan xeerarka kale ee khuseeya, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, Mabaadi'da Hagidda iyo heerarka kale ee P&P 5-301.

B. Waafaqsan Xeerka iyo Tababarka

Saraakiishu waa inay u isticmaalaan oo kaliya eyga askarta si aan kala sooc lahayn, waana marka aw xooggaasi macquul yahay oo uu waafaqsanyahay tababarada MPD ee hadda jira iyo xeerarka MPD ee xukuma isticmaalka xoogga (oo ay ku jiraan dhammaan qaybaha P&P 5-300).

C. Ku dhufashada

1. Ku dhufashada waa la samayn karaa kaliya:
 - a. Marka xooga noocaas ahi ay lagama maarmaan noqoto si looga ilaaliyo sarkaalka, la beegsadaha, ama qolo kale waxyeello jireed oo si ula kac ah wax ugeysan karta.
ama
 - b. La beegsadaayaasha sida fir-fircoon uga-hortagaya haddii isku dayo yar oo lagu xakameynayo ay ahaayeen ama ay u badan tahay inay noqdaan kuwo aan waxtar lahayn (sida waafaqsan qaybta P&P 5-301 ee Xoogga Ujeeddada Macquulka ah ee waafaqsan Xeerka, Sharciga iyo Tababarka).

2. Wax garaaciss waa inaan lagu sameyn dadka u hoggaansama ama si aan toos ahayn u diidaya sida ku qeexan xeerka.

D. Daawaynta iyo Gargaarka Caafimaadka

Marka lagu daro daawaynta caadiga ah ka dib isticmaalka xoogga (sida uu qabo P&P 5-301), marka ay saraakiishu wax garaacaan, ama haddii xoogga jireed ay keento in labeesadaha uu madaxa ku dhufado shay ama sagxad, daawaynta la beegsadaha waa in lagu daraa kormeer fiiris ah meelaha ay ku taalo dhaawaca calaamadaha garaacista, marka ay ku habboon tahay Saraakiisha waa inay si joogto ah ula socdaan xaaladda caafimaad ilaa lagu wareejiyo shaqaalaha caafimaadka ama shaqaalaha kale ee sharci fulinta.